

IIB MA GALO  
FAAFINTA RASMIGA

الرسمية  الجريدة

JAMHUURIYADDA DEMOQRAADIGA SOOMAALIYA

جمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 12aad Muqdisho 1 Febraayo 1984 L. 2

FAAFIN BIL SOO BAXA

جريدة شهرية

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanaadki waa Sh. 100 Soomaaliya gudeheeda - dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janaayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. Rukunka iyo qortitaanku wazna la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

K O O B N I I N

QAYBTA KOWAAD

S H A R C I

Bogga 76

SHARCI L. 8 ee 9 Jen. 1984. Wa xk abeddelid tacriifada canshuurta maamulka iyo tirada.

QAYBTA

LABAAD

78

XEER

XEER WASAARADDA GAADIIDKA BADDA IY DEKEDAHA L. 1 ee 1da Febraayo 1983 Xeer-Nidaaminta Tariifada Dekedaha.

SAXID QALAD

Faafinta Rasmiga ah L. 2 ee 1 Feb. 1983 oo si lama filaan ah ugu soo baxay Xeer Nidaaminta Tariifadaha Dekedaha

Waxaa lagu saxay Faafintan Rasmiga ah.

QAYBTA SADDEXAAD

TALOOPYIN ISGAARSIIN OG. IYO WIXII LA MID AH.

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR,

21.1.84, Lumid Jeeg War. L. 709599 ku » 114  
qoran Xaaji Cali Axmed L. 29

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR,

21.1.84, Lumid Jeeg War. L. 709603 ku » 115  
qoran Xaaji Cali Axmed L. 30

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR,

21.1.84, Lumid Jeeg War. L. 709606 ku » 116  
qoran Xaaji Cali Axmed L. 31

MAXKAMADDA GOBOLKA TOG/DHEER

7.12.1983, Lumid Jeeg. War. ku qoran » 117  
Cabdi Faarax Xersi

MAXKAMADDA GOBOLKA TOG/DHEER

7.12.1983, Lumid Jeeg. War. ku qoran » 118  
Cabdi Faarax Xersi

MAXKAMADDA GOBOLKA TOG/DHEER

7.12.1983, Lumid Jeeg. War. ku qoran » 119  
Cabdi Faarax Xersi

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR,

8.1.84, Lumid Buug Kayd L. 2807 ku qo- » 120  
ran Maxamuud Negeeye Abtidoon.

QAYBTA KOOWAAD  
SHARCI

Sharci lambar 8 taariikh 9 Jen. 1984, Wax ka beddelid  
tacriifada canshuurta keenidda iyo maamulka iyo  
tirada.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga  
Joog'ada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Alaabta la beddelay waxna ay u dhimman yihiin  
(semi lavorati) ee Warshadaha Dalka u soo degsadaan  
alaab ceyriin ahaan (as raw materials) iyo qalabka da-  
yactirka (spare parts) makiinadaha Warshadaha iyo  
Beeraha, Kalluumaysiga iyo kuwa la xiriira horumarin-  
ta xannaanada Xoolaha, canshuurta keenidda iyo tan  
maamulka iyo tirada halka ay maanta joogaan waxaa  
laga dhimay 50%.

Waxaa kaloo laga dhaafay canshuurta keenidda  
iyo maamulka iyo tirada alaabta cayriin ee aan soo ma-  
rin wax beddel ah (non processed raw materials) ee  
Warshadaha Dalku ku shaqeeyaan ama beddelaan.

Qod. 2aad

Warshad waxaa loola jeedaa makiinado iyo qalab  
la xiriira ee meel ku rakiban, looguna talo galay in ay  
beddelaan alaab ceyriin (trasformare materia prime)  
ama ay dhammeystiraan kuwa beddeliddooda wax ka  
dhima yihiin uuna tilmaamaayo Sharci lambar 26 ee  
10.11.1961.

Sidoo kale alaab ceyriin ee aan la beddelin waxaa  
loola jeedaa sheyga ku sugan sidii Ilaah u abuuray oo  
aan dabeecaddiisa, muuqaalkiisa, dhadhankiisa wax  
laga beddelin.

Qod. 3aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 9 Jen. 1984

MADAXWEYNAHA JDS  
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)



QAYBTA LABAAD  
X E E R

XEER WASAARADDA GAADIIDKA B. IYO DEKEDAHA, L. 1 ee 1 Feb. 1983, Xeer-Nidaaminta Tariifada Dekedda.

WASIIRKA

WASAARADDA GAADIIDKA BADDA & DEKEDAHA  
MARKUU ARKAY: Dastuurka Jainhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya;

MARKUU ARKAY: Sharciga Lr. laad ee soo baxay 21kii Oktoobar, 1969kii;

MARKUU ARKAY: Sharciga Lr. laad ee soo baxay 7dii Jennaayo, 1973kii ee lagu dhisay Wakaaladda Dekedaha Soomaaliyeed; qodobkiiisa 3aad baara-garafka 3aad Xarafka (a);

MARKUU ARKAY: Sharciga Lr. 17aad ee soo baxay 21kii April, 1974kii kuna saabsan awoodda Wasii-raddu ku leeyihiin Wakaaladaha raacsan;

MARKUU ARKAY: Talada Guddoomiyaha Wakaaladaha Dekedaha Soomaaliyeed;

MARKUU TIXGELIYEY: Baahida loo qabo Xeer-nidaamin lagu dhaqan geliyo Tariifada hawlaha Dekedaha Dalka;

WUXUU SOO SAARAY

XEERNIDAAMINTA IYO TARIIFADA LA SOCOTA

Qodbka laad

UJEEDDADA TARIIFADA

Wasiirku wuxuu aqoonsaday baahida degdegga ah oo loo qabo Xeer-nidaamin lagu dhaqan geliyo Tariifada Dekedaha iyadoo loola jeedo iney Wakaaladda Dekedaha Soomaaliyeed gaari karto ujeeddadii ahayd isku fillaansho dhaqaale.

QODOBKA 2aad

BAABIIN

Waxaa la baabi'iyey wax alla wixii ahaa Xeer-nidaamin aan la socon karin Xeer-nidaamintan.

QODOBKA 3aad

DHAQAN GELIN

Xeer-nidaamintanu waxay dhaqan geleysaa 1da Jennaayo 1983da. waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

WASIIRKA W. GAADIIDKA BADDA & DEKEDAHA

(J/le Dr. Cabdisalaam Sh. Xuseen)

MACNAHA TARIIFADA  
MARAAKIIBTA IYO BADEECADDA

Qodobka laad

GUUD AHAAN

Waxaa lagu caddaynayaa tariifadan khidmadaha laga qaadayo maraakiibta iyo badeecadda marta Dekedaha Dalka ee Muqdisho, Berbera, Kismaayo, Marka. Tariifadan oo lagu tuhay Tabeellayaal isku daba taxan habka xuruufta taatiinka waxaa la socda qodobbadii sharci ahaan loogu dhagan gelin lahaa.

T A B E E L L A

- A & B — Hawlaha Xeebta iyo Doon ku dejinta
- C — Hawlaha Godka Markabka
- D — Dakhliga hawlaha Guud
- E — Marinka la qoday
- F — Qaadda Xarigga Markabka
- G — Ku Xirnaashaha Dekedda
- H — Hawlaha Biloodka
- I — Dakhliga Jiidda iyo Taagga
- J — Ijaarka Wiishashka Rakiban
- K — Ijaarka Wiishashka socda
- L — Ijaarka Forkliftka
- M — Ijaarka Tractor iyo Gawaadhida (Trailers)
- N — Ijaarka Qalabka lagu dejiyo badeecadda
- O — Ijaarka qalabka badda
- P — Ijaarka bakhaarrada
- Q — Hawlaha kala duwan (Miscellaneous service)
- R — Saarista/Dejinta gaadiidka socda sida baabuurta. Cagafcagafyada iwm.
- S — Dakhliga Doonyaha la saaro
- T — Saliidda Dhumaha Marta.

MICNAHA EREYO GAAR AH

Haddii aan si kale loo micnayn ereyada halkan ku qoran waxaa loola Jeedaa:-

« TANKA » 1000 KG.

« NRT » Culayska saafiga ah ee Markabka.

( GRT » Culayska guud ee Markabka.

« BAKHAAR » Meelaha Dekedda ah ee badeecadda la dhigo ama ha ahaadeen meelo bannaan ama kuwa gabaad iyo dabool leh.

« MAALIN » 24 saacadood oo ah 06.00 - 06.00 subaxni-mo.

« SAACAD » Inta Qoraxdu soo jeedo

« SH. SO. » Shillin Soomaali

« DHEERER GUUD (OAL) » Dheererka Markabka oo dhan.

« AL/TA AAN NADIIF AHAYN » Timirta, Xoolaha, Nool, Shaaniintada, Daamurka, Saliidda Iwm.

« WIISHKA DEKEDDA » Wiishka Dekedda ku raki-ban ama ha ahaadeen kuwa reyl dul socda ama ku-wa meel ku dhidban.

« ISO » Ururka Caalamiga ah oo qaabilsan qiyaasta containerka.

## QAYBTA II

### HAWLAHA XEEBTA

Qodobka 1aad.

### SIDA LACAGTA LAGU QAADAYO

1. Dhammaan lacagta Saarista iyo Dejinta badeecadda waxaa lagu qaadayaa miisaan.

2. Dhammaan Khidmadaha Saarista iyo Dejinta oo uu miisaan gun u yahay waxaa lagu qaaday Tan.

3. Qayb kasta oo Tan-ka mid ah waxaa loo qaadayaa Tan. buuxa.

4. Haddii wararka ku qoran warqadaha dadku wataan ay ku fillaan waayaan ama lagu kalsoonaan waa-yo. Wakaaladdu waxay xaq u leedahay inay alaabta miisaanto ama cabbirto khidmaddana ku qaadato had-ba kii badan.



QODOBKA 2aad

KONTAYNARKA MARAN

Kontaynarka faaruqa ah waxaa wax looga qaadayaa sida ku cad tabbeellayaasha A & B ee Tariifadan isaga oo la xisaabin badeecad oo kale.

QODOBKA 3aad

1. Alaabta aan nadiifta ahayn Dekeddana kaga tagta wasakh ama wax yeesha dhuka, daska iyo badeecadda kale waxa laga qaadayaa 20% dheeraad ah ee Tariifada ku xusan Tabbeellaha (A & B). Wakaa ladda Dekeedu iyadoo awood u leh caddeynta hadba alaabtii Xeerkan geli karta ee laguna sheegi karo badeecad aan nadiif ahayn.

2. Alwaaxdii ku timaada iyadoo aan isku xirnayn oo kala daadsan waxaa laga qaadayaa 30% dulsaar ah ee tariifada ku cad tabbeellayaasha (A & B).

QODOBKA 4aad

CELIN IYO DHIMID TARIIFO

1. Haddii alwaaxda lagu keeno ama lagu raro iyadoo aan xirxirnayn aad la isugu hilay oon kala daadsanayn ayna fududayn karaan isticmaalka qalabka sida Forklifts waxaa cidda leh loo celinayaa ama laga dhimayaa 5% Tariifada ku cad Tabbeellayaasha (A & B) ee Xeerndaamintan.

2. Haddii badeecadda lagu soo dejiyo ama lagu dhoofiyo iyadoo ku rasaysan looxyada loo yaqaan «PALLETS» laguna shaqayn karo qalabka makiinada ha gaar ahaan «FORKLIFTS» waxaa cidda leh alaabta laga dhimayaa 3% ee Tariifada ku tilmaaman tabbeellayaasha (A & B) ka dib marka ay cidda lihi sidaas soo codsato. Haddii Palletka lagu furfuro ama lagu raseeyo Dekedda wax lacag ah oo celinaayo ama la dhimayaa ma jirto.

3. Badeecadda jawaannada ku jirta haddii la soo dejiyo ama la raro iyadoo xirna xirno ah oo markabka ku raacdo ama ku keeno, cidda leh badeecadda waxaa laga dhimayaa 3% Tariifada ku tilmaaman Tabbeelayaasha (A & B).

4. Badeecadda lagu raro ama lagu soo dejiyo saanaadiqda birta ah ee loo yaqaan «CONTAINERS» oo waafaqsan cabirrada iyo hannaanka hay'adda « ISO » (International Organization For Standardization) waxaa laga dhimayaa 4% Tariifada ku tilmaaman Tabbeelayaasha (A & B).

5. Haddii badeecad ku wada qoran hal xaasni shixnadeed (B/L) dhammaantood si toos ah looga qaato markabka gadaankiisa loogalana baxo Dekeeda (Direct delivery from the Ship's rail), waxaa laga dhimayaa 40% Tariifada ku qoran Tabbeelayaasha (A&B).

### QAYBTA III

#### HAWLAHA MARKABKA DUSHIISA & KHANANKA

#### QODOBKA 5aad

#### SALDHIGGA XISAABINTA

1. Dhammaan shaqada laga qabto markabka dushiisa iyo Khananka waxaa lagu qaadayaa miisaan marka laga reebo Xoolaha Nool oo iyaga wax lagaga qaadayo neef ahaan.

2. Iyadoo la tixgelinayo hadba heshiiska ka dheexeya Markabka iyo cidda alaabta leh, lacagta loo yaqaan «STEVEDORING» waxaa bixinaya Markabka iyo wakiilkiisa, haddaanu wakiilkiisu keenin cgeysiis hormaris ah oo lagu caddaynayo cidda lagu leeyahay.

3. Shaqada saacadaha dheeraadka ah ee laga qabanayo Markabka dushiisa waxaa la fulinayaa ka dib markii Markabka ama Wakiilkiisa laga helo codsi qoraal ah.

4. Shaqada saacadaha dheeraadka ahi waxaa lagu xisaabtamayaa waqtiyada ah:-

- |                            |               |
|----------------------------|---------------|
| (a) Maalin Caadi ah        | 18.00 — 06.00 |
| (b) Jimce iyo Ciidaha kale | 06.00 — 06.00 |

#### QAYBTA IV

#### HAWLAHA GUUD IYO HILINNADA QODAN

#### QODOBKA 6aad

#### ISTICMAALKA

Lacagta hawlaha guud ahaaneed iyo marimmada qodan waxaa Markab walba laga qaadayaa hal mar halkii safar Dekedii uu galaba.

#### QODOBKA 7aad

#### DHIMID

1. Maraakiibta ay leeyihiin Wakaaladda Gaadiidka Badda Soomaaliyeed ama laamaha kale Dawladda Soomaaliyeed ciddii la wadaagin waxaa laga dhimayaa 50% lacagta ku tilmaaman Tabbeellayaasha (D & E).

2. Maraakiibta Dekedda u soo gasha sababaha ay ka mid yihiin hawadoo ku xumaatay, caddilaad, qalaaqil shaqaale, gargaar caafimaad iyagoon dejinayn ama qaadayn dabeecad ama rakaab waxaa laga qaadayaa 25% Tariifada ku xusan Tabbeellayaasha (D & E) ka dib markey joogaan 12 saacadood oo lacag la'aan ah.

3. Maraakiibta Dekedda u soo gasha sababaha ay ka mid yihiin, soo caarsiin, kadib, safayn, baaris ama rijiyeyn, waxaa laga qaadayaa ( $\frac{1}{2}$ ) nus Tariifada ku taal Tabbeellayaasha (D & E).

4. Maraakiibta Dekedda u soo gasha sababaha ay ka mid yihiin, qaadasho Shidaal, biyo, cunno ama shay kale iyagoon dejin ama qaadin badeecad ama rakaab waxaa laga qaadayaa ( $\frac{1}{3}$ ) hal seddex dalool lacagta ku tilmaaman Tabbeellayaasha (D & E)



QODOBKA 8aad

LACAG DHAAFID (EXCEMPTIONS)

1. Maraakiibta marsada u timaadda iney dejiyaan ama qaadaan rakaab ama boosto keliya iyagoon Dekedda ku soo xiran waxaa laga saamaxayaa dhammaan lacagaha ku tilmaaman Tabbeellayaasha (D&E). Laakiin haddii ay maraakiibtaasu badeecad kale keenaan ama qaadaan oo lagaga shaqeeyo Dekedda dibaddeeda waxaa laga qaadayaa Tariifada buuxda sida ku xusan Tabbeellayaasha (D & E).

2. Maraakiibta dagaalka dal kasta ha lahaadee waxaa laga dhaafayaa dhammaan lacagta ku tilmaaman Tabbeellayaasha (D & E)

QAYBTA V

SOO XIRIDDA MARAAKIIBTA

QODOBKA 9aad

ISTICMAALKA

1. Lacagta xiridda maraakiibta waxaa laga qaadayaa markab kasta oo Dekedda soo galaya ama ka baxaya ama dhaqdhaqaaq ku sameynaya Dekedda gudaheeda.

2. Baahida loo qabo in la isticmaalo tashiilaadka xiridda ama ha ahaadeen dad ama qalab waxaa go'aankeeda leh hoggaamiyaha (PILOT) markaas markabka soo gelinaya ama saaraya.

QODOBKA 10aad

DHIMID

Maraakiibta dhaqdhaqaaqa ku samaynaysa Dekedda gudaheeda waxaa laga qaadayaa nus ( $\frac{1}{2}$ ) Tariifada ku tilmaaman Tabbeellaha (F).



QODOBKA 11aad

DHAAFID KHARAJ

Haddii ujeeddada xiridda, furidda ama dhaqdhaqaaqa kale ee Markabku samaynayaa ay tahay danta Dekedda oo keeliya ma jirto wax lacag ah oo laga qaadayo dhaqdhaqaaqan dartii.

QAYBTA VI

JOOGISTA DEKEDDA

QODOBKA 12aad

1. Lacagta joogista waxaa laga qaadayaa Markabka muddada uu ku xiran yahay Dekedda.

2. Lacagta joogista waxaa lagu xisaabinayaa dhererka guud ee Markabka (Mitr) iyo maalmaha uu joogo. Qayb kasta oo ka mid ah hal mitir waxaa loo qaadanayaa mitir buuxa.

QODOBKA 13aad

DHAAFID KHARAJ

Maraakiibta dagaalka cid kasta ha lahaatee haddii ay Dekedda usoo galaan ujeeddada ah booqasho gacalkooyo, qaadasho shidaal, biyo iyo sahay kale ama gargaar caafimaad waxaa loo ogol yahay iney Dekedda ku xirnaadaan lacag la'aan 24ka saacadood ee u horreeya joogistooda. Haddii ay joogistoodu ka badato muddada kor ku tilmaaman waxaa laga qaadi lacag buuxda sida ku xusan Tabbeelaha (G).

QAYBTA VII

HOGGAAMINTA MARAAKIIBTA

QODOBKA 14aad

ISTICMAALKA

Lacagta Hoggaaminta Maraakiibta waxaa laga qaadayaa markii uu hoggaamiyaha Dekeddu (Pilot) u

QODOLKA QAYBTA VII  
HOGGAAMINTA MARAAKIIBTA  
QODOBKA 14aad  
ISTICMAALKA

QODOBKA 15aad

HOGGAAMIN KHASAB AH

Dhammaan Maraakiibta soo gelaya Dekeddaha dhisan ee Jamhuuriyadda. Dimoqraadiga Soomaaliya waxaa khasab ku ah iney soo geliyaan/bixiyaan hoggaamiyayaasha Dekedda markay geliyaan iyo markay baxayaanba.

QODOBKA 16aad

DHAAFID HOGGAAMIN KHASAB AH

Hoggaaminta khasabka ah waxaa laga dhaafayaa:

- (a) Maraakiibta culayskoodu saafiga ahi aanu ka badnayn 200 Ton.
- (b) Dhammaan Maraakiibta Kalluumaysiga.
- (c) Doonyaha yar yar.
- (d) Maraakiibta dagaalka.
- (e) Maraakiibta haysata shahaado ay bixisay Wakaaladaha Dekedaha Soomaaliyeed oo laga gaga cafiyo hoggaaminta khasabka, taasoo aanu waqtigeedii dhicin.

QODOBKA 17aad

DHIMID

Maraakiibta dhaqdhaqaaq ku samaynaysa Dekedda gudaheeda, waxaa laga qaadayaa nus ( $\frac{1}{2}$ ) lacagta hoggaaminta ee ku tilmaaman Tabbeelaha (H).

QODOBKA 18aad

XAYIRAAD HOGGAMIYAHA

Haddii hoggaamiyaha la soo dalbado waqti magacaaban oo lagu diyaariyo waqtigaas la magacaabay laakiin aanu markabku sababtiis darteed uga faa'iidayaan waayo waxaa loo ogol yahay nusa saac (30 daqiiqo) oo lacag la'aan ah. Wixii nusa saacadaha ka dambeeya waxaa laga qaadayaa lacagta ku qoran Tab-

beellaha (Q) nusa saace kasta. Qayb kasta oo ka mid ah 30 daqiiqo waxaa loo xisaabinayaa nusa saaca dhan. Maamulka Wakaaladda Dekeduhu wuxuu awood u leeyahay inuu lacagtaas saamaxo haddii ay yimaadaan xaalado gaar oo la habsado iney si allah u dhaceen ciddina aanay wax ka qaban karin.

QODOBKA 19aad

BAAHIDA DEKEDDA

Haddii Markabka meel looga dhaqaajiyo baahida Dekedda lacagta Hoggaaminta waa la saamaxayaa.

QAYBTA VIII

HAWSHA TAAGAGGA

QODOBKA 20aad

ISTICMAALKA TAAGAGGA

Maraakiibta Dekedda u soo galeysa iney dejiyaan ama qaadaan badeecad, boosto ama rakaab ama cunno iyo biyo ama gargaar caafimaad, waxaa khasab ku ah iney isticmaalaan Taagagga Dekedda.

QODOBKA 21aad

DHAQDHAQAAQA DEKEDDA GUDAHEEDA.

Maraakiibta dhadhaqaaq ku samaynaysa Dekedda gudaheeda waxaa laga qaadayaa nus ( $\frac{1}{2}$ ) Tariifada ku tilmaaman Tabbeellaha (I).

QODOBKA 22aad

SAAMAXAAD

Maraakiibta hoos ku tilmaaman khasab kuma aha isticmaalka taagagga Dekedda:-

- (a) Maraakiibta dagaalka ee Soomaaliya.
- (b) Doonyaha yaryar.
- (c) Maraakiibta Kalluumeysiga.
- (d) Qalabka lagu raaxaysto iyo huuriyada.
- (e) Maraakiibta culayska saafiga ahi aanu ka badnayn 200 Ton.

QODOBKA 23aad  
CAFIS LACAGEED

Maamulka Dekeddu wuxuu awood u leeyahay inuu ka saamaxo shaqada khasabka ah ee taagga haddii ay yimaadaan xaalado gaar Marabkuna soo codsado.

QAYBTA IX  
IJAAR WIISHASHKA IYO QALABKA KALE BERRIGA

QODOBKA 24aad  
WIISHASHKA RAKIBAN

Maraakiibta ba'eeccadda dejineysa ama qaadayso waxaa khasab ku ah iney isticmaalaan wiishashka rakiban Dekeddii leh.

QODOBKA 25aad  
CAFIS ISTICMAAL WIISH

Maamulka Dekeddu wuxuu awood u leeyahay inuu joojiyo isticmaalka wiishashka rakiban meeshii uu arko inaaney habboonayn ama ha ahaato xag dhaqaale ama xag farsama (Tusaale doonyaha). Markaas oo kale Maamulka Dekeddu wuxuu amri karaa in la isticmaalo wiishashka Markabka ama kuwa dhulka socda hadba kii ku habboon.

QODOBKA 26aad  
DEKEDDA DIBADDEEDA

Lacagta wiishashka socda, Forkliftska, Cagafcagafyada iyo Gaariyada lagu siticmaalo Dekedda dibaddeeda waxaa loogu xisaabtamayaa maalintii oo ke-liya muddada uu haysto qofka ama cidda isticmaalayaa. Saacadaha habeennimo waxba laga qaadi maayo haddii aan la soo caddayn in habeennimo lagu shaqays-tay.

QAYBTA X

QODOBKA 27aad

QALABKA BADEECADDA LAGU HILO

Qalabka badeecadda lagu hilo marka Saarista iyo Dejinta sida baaletka, waayirrada, xargaha, silsiladaha Iwm. waxaa ijaar ahaan loo siinayaa Maraakiibta kadib marka codsi qoraal ah laga helo Markabka ama Wakiilkiisa.

QAYBTA XI

QALABKA BADDA

QODOBKA 28aad

1. Wixii ka baxsan hawlaha caadiga ee Dekedda qalabka badda sida taagagga motoorrada, doonyaha Iwm. waxaa si gaar looga ijaari karaa ciddii doonaysa ama ha ahaato Dekedda gudaheeda ama dibaddeeda, waxaana laga qaadayaa lacagta ku tilmaaman Tabbeellaha (O).

2. Markii ay xaalado gaar la yimaadaan baahi gaar lacagaha ku qoran Tabbeellaha (O) waa la beddeli karaa iyadoo loo samaynayo heshiis gaar waxaana awooddeeda leh Maamulka Dekedda.

QAYBTA XII

IJAARKA BAKHAARRADA

QODOBKA 29aad

BADEECADDA SOO DEGTA

Badeecadda soo degta waxaa loo ogol yahay 5 (Shan) beri oo ijaar la'aan ah iney Dekedda taal laga bilaabo maalinta ay ka soo degto Markabka.

QODOBKA 30aad

BADEECADDA DHOOFEYSA

Badeecadda dhoofeysa waxaa loo ogol yahay 5 (Shan) beri oo ijaar la'aan ah marka laga bilaabo maalintey soo gasho bakhaarka Dekedda



### QODOBKA 31aad

#### GOOBAHA BADEECADDA-LA DHIGO

Lacagta ijaarka bakhaarrra waxaa laga qaadayaa badeecadda la dhigo bakhaaradda dadan iyo barxadaha bannaan; waxaana sharci ahaa nloogu yeelanaayaa ilaa marka Dekedda lagala baxayo ama la saarayo Markabka, ha ahaato mid la dhoofiyo ama dalka gu-dihiisa geleysa.

### QAYBTA XIII

#### BAABUURTA IYO QALABKA KALE SOCDA

### QODOBKA 32aad

#### SHAQADA XEEBTA

Lacagta shaqada soo Dejinta ama Saarista ee Xeebta ee baabuurrada, cagaacagafyada Iwm. waxaa laga qaadayaa tariifada ku tilmaaman Tabbeellaha (R).

### QODOBKA 33aad

#### SHAQADA MARKABKA DUSHIISA

Lacagta hawlaha Markabka dushiisa ee baabuurta iyo qalabka kale ku tilmaaman Tabbeellaha (R) waxaa wax looga qaadayaa sida badeecadda guud ee ku qoran Tabbeellaha (C).

### QAYBTA XIV

#### SALIIDDA MARKABKA ISKA SHUBO

### QODOBKA 34aad

#### DAKHLIGA HAWLAHA GUUD

Saliidda ceeriin iyo tan safaysan iyo wixii kaloo la mid ah ee uu Markabka iska shubo ama soo nuugo waxaa laga qaadayaa dakhliga hawlaha guud ee ku tilmaaman Tabbeellaha (T).

### QODOBKA 35aad

#### SHIDAALKA MARAAKIIBTA

Saliidda ay Maraakiibtu shidaal ahaan u qaadato

ee ay ka soo nuugaan goobaha dhulka waxaa wax looga qaadayaa sida ku tilmaaman Tabbeellaha (T).

QAYBTA XV

DAKHLIGA KALA GEDISAN

QODOBKA 36aad

SAFAYNTA GODKA MARKABKA

Shaqaalaha Dekeddu waxay nadiifanayaan godka Markabka ka dib marka Markabka ama Wakiilkiisa laga helo codsi qoraal ah waxaana laga qaadayaa lacagta ku qoran Tabbeellaha (Q).

QODOBKA 37aad

DIYAARINTA WIISHKA MARKABKA

Shaqaalaha Dekeddu waxay wiishashka Markabka u diyaariyaan hab shaqo ama hab safar ka dib markii Markabka a maWakiilkiisa laga helo codsi qoraal ah waxaana laga qaadayaa lacagta ku tilmaaman Tabbeellaha (Q).

QODOBKA 38aad

FURIDDA IYO XIRIDDA GODKA MARKABKA

Shaqaalaha Dekeddu waxay furayaan ama xirayaan godka Markabka ka dib markii Markabka ama Wakiilkiisa laga helo codsi qoraal ah, waxaana laga qaadayaa lacagta ku qoran Tabbeellaha (Q).

QODOBKA 39aad

QAADKA CULUS

Lacagta shaqada badeecadda ee ku tilmaaman Tabbeellayaasha Tariifadan, waxaa dheer ooy dadka badeecadda lihi ka bixinayaan halkii qaad (Lift) ee gaadha ama ka badan 5(Shan) tan culays ahaan lacagta ku qoran Tabbeellaha (Q).



QODOBKA 40aad

RAKAABKA

Lacagta Rakaabka ee ku qoran Tabbeellaha (Q) waxaa loola jeedaa hal qof iyo laba cuddadood oo gacanta lagu sido.

QODOBKA 41aad

BADEECADDA LAGA RARO/DEJIYO DOONYAHA

Kharajka badeecadda lagu Raro/Dejiyo Doonyaha ee Xeebta ama ha ahaato meesha shaqada lagu qabtaa Dekedda debbedeeda ama gudaheeda waxaa laga qaadi lacag 25% dheeraad ku ah qiimaha ku xusan Tariifada Wakaaladda shaxda ( A & B ).

DHAMMAAD

WAKAALADDA DEKEDAHA SOOMAALI

TARIIFADA DAKHLIGA

TABBEELLA «A»

SAARIS IYO DEJIN

MUQDISHO, BERBERA, KISMAAYO

BADEECADDA	MIISAANKA AMA	FAAHFAAHIN	
	TIRADA	SAARIS	DEJIN
Shamiinto Jawaan ku jirta	1000 KG.	Sh. So. 63/=	Sh. So. 63/=
Digo Xoolaad	»	» 28/=	» 28/=
Badeecadda Jaw. ku jirta	»	» 54/=	» 56/=
Hilib Gasaceysan	»	» 50/=	» 50/=
Muuska	Kartoon	» 1/25	» 1/25
Badeecadda Khatarta ah	1000 KG.	» 45/=	» 50/=
Lugaha Baabuurta	»	» 120/=	» 140/=
Raadiyo iyo Qalabkiisa	»	» 170/=	» 200/=
Tarraq	»	» 110/=	» 120/=
Fuustooyin Faaruq ah	»	» 110/=	» 170/=
Kabaha Nooc kasta	»	» 110/=	» 160/=
Caleen Shaah	»	» 90/=	» 320/=
Sigaar iyo Buuri	»	» 130/=	» 150/=

Xaashiyaha Musqusha	»	»	300/=	»	320/=
Hargaha ariga	»	»	10/=	»	12/=
Sponji Tuuqsama	»	»	300/=	»	320/=
Bundad Cudbi ah	»	»	56/=	»	72/=
Alwaaxda	»	»	80/=	»	96/=
Qasacda Faaruqa iyo Daboolak/da	»	»	155/=	»	170/=
Tuubo Balastiik ah	»	»	30/=	»	40/=
Geel	N E E F	»	6/=	»	6/=
Lo'	N E E F	»	4/=	»	4/=
Adhi	N E E F	»	1/=	»	1/=
Badeecadda Guud	1000 KG.	»	68/=	»	70/=
Nacnac Iwm.	»	»	100/=	»	120/=
Dek.Ber/ra way ka duw/y Xool.					
Geel	N E E F	»	10/=		10/=
Lo'	N E E F	»	7/=	»	7/=
Adhi	N E E F	»	2/=		2/=

WAKAALADDA DEKED AHA SOOMAALIYEED

TARIIFADA DAKHLIGA

TABBEELLA «C»

HAWLAHA MARKABKA DUSHIISA

B A D E E C A D D A	MIISAAN MUQDISHO BERBERA KISMAAYO MARKA				
	AMA TIRO	Sh.So.	Sh.So.	Sh.So.	Sh.So.
Shamiinto	1000 KG.	35/=	35/=	35/=	—
Badeecadda Jawaannada	»	35/=	35/=	35/=	—
Badeecadda Guud	»	35/=	35/=	35/=	—
Alaabta Khatarta ah	»	40/=	40/=	40/=	—
Hilib Qasacadeysan	»	35/=	35/=	35/=	—
Geela	N E E F	8/=	10/=	8/=	—
Lo'da	N E E F	6/=	7/=	6/=	—
Ariga	N E E F	1.50	1.50	1.50	—

WAKAALADDA DEKEDAHA SOOMAALIYEED

TARIIFADA DAKHLIGA

TABBEELLA «D»

PORT DUES

C U L A Y S K A

SALDHIGGA MUQDISHO BERBERA KISMAAYO MARKA

DAKHLIGA Sh.So. Sh.So. Sh.So. Sh.So.

1-2000 NRT	MARKABKII	2000/=	1000=/ /	2000=/ /	—
2001-4000 NRT	»	3000/=	2000/=	6000/=	—
4001-6000 NRT	»	5000/=	4000/=	10000/ =	—
6001-8000 NRT	»	6000/=	5000/=	15000/=	—
8001-1000 NRT	»	7000/=	6000/=	20000/=	—
Ka badan 10000 NRT	»	8000/=	7000/=	25000/=	—

WAKAALADDA DEKEDAHA SOOMAALIYEED

TARIIFADA DAKHLIGA

TABBEELLA «E»

KHARAJKA MARAAKIIBTA SOO GELIDDA DEKEDDA

CULAYSKA	SALDHIGGAMUQDISHO BERBERA KISMAAYO MARKA					
	MARKABKA	DAKHLIGA	Sh.So.	Sh.So.	Sh.So.	Sh.So.
1-2000 NRT	MARKABKII	5000/=	1000/=	5000/=	—	—
2001-4000 NRT	»	»	10000/=	1500/=	10000/=	—
4001-6000 NRT	»	»	20000/=	5000/=	15000/=	—
6001-8000 NRT	»	»	25000/=	7000/=	20000/=	—
8001-10000 NRT	»	»	30000/=	8500/=	25000/=	—
Ka badan 10000 NRT	»	»	35000/=	10000/=	30000/=	—

WAKAALADDA DEKEDAHA SOOMAALIYEED

TARIIFADA DAKHLIGA

TABBEELLE «F»

KU XIRASHADA DEKEDDA

CULAYSKA

SALDHIGGAMUQDISHO BERBERA KISMAAYO MARKA

MARKABKA

DAKHLIGA

Sh.So.

Sh.So.

Sh.So.

Sh.So.

1-2000 NRT

LARKAB/MARKII

400/=

400/=

400/=

—

2001-4000 NRT

»

600/=

600/=

600/=

—

4001-6000 NRT

»

800/=

800/=

800/=

—

6001-8000 NRT

»

1000/=

1000/=

1000/=

—

8001-10000 NRT

»

1200/=

1200/=

1200/=

—

Ka badan 10000 NRT

»

1400/=

1400/=

1400/=

—



WAKAALADDA DEKEDAHA SOOMAALIYEED

TARIIFADA DAKHLIGA

TABEELLA «G»

MUDDADA MARKABKU DEKADA KU XIRAN YAHAY

FAAHFAAHIN

SALDHIGGA MUQDISHO BERBERA KISMAAYO MARKA

	DAKHLIGA	Sh.So.	Sh.So.	Sh.So.	Sh.So.
MARKAB	MAALIN/METER	25/=	25/=	25/=	—

WAKAALADDA DEKED'AHA SOOMAALIYEED

TARIIFADA DAKHLIGA

TABBEELLA «H»

HOGGAAMINTA MARAAKIIBTA

CULAYSKA	SALDHIGGA MUQDISHO BERBERA KISMAAYO MARKA				
MARKABKA	DAKHLIGA	Sh.So.	Sh.So.	Sh.So.	Sh.So.
1-2000 GRT	GRT/OPE/N	0.20	0.20	0.20	—
2001-4000 GRT	»	0.40	0.40	0.40	—
4001-6000 GRT	»	0.50	0.50	0.50	—
6001-8000 GRT	»	0.60	0.60	0.60	—
8001-10000 GRT	»	0.70	0.70	0.70	—
Ka badan 10000 GRT	»	0.80	0.80	0.80	—

WAKAALADDA DEKEDAHA SOOMAALIYEED  
TARIIFADA DAKHLIGA  
TABBEELLA «I»  
KHARAJKA TAAGAGGA

CULAYSKA	SALDHIGGA	MUQDISHO	BERBERA	KISMAAYO	MARKA
MARKABKA	DAKHLIGA	Sh.So.	Sh.So.	Sh.So.	Sh.So.
1-2000 GRT	MARKAB/MARKIIBA	2000/=	1500/=	1500/=	—
2001-4000 GRT	»	»	2500/=	2000/=	2000/=
4001-6000 GRT	»	»	3000/=	2500/=	2500/=
6001-8000 GRT	»	»	3500/=	3000/=	3000/=
8001-10000 GRT	»	»	4000/=	3500/=	3500/=
Ka badan 10000 GR	»	»	4500/=	4000/=	4000/=
Guul Victory	SAACADDII	3500/=	—	—	—

WAKAALADDA DEKED AHA SOOMAALIYEED

TARIIFADA DAKHLIGA

TABBEELLAHA «J»

IJAARKA WIISHASHKA RAKIBAN

QAADKA	SALDHIGGA	MUQDISHO	BERBERA	KISMAAYO	MARKA
WIISHKA	DAKHLIGA	Sh·So·	Sh·So·	Sh·So·	Sh·So·
1-3000 TONS	SAACADDII	300/=	300/=	300/=	——
3001-5000 TONS	»	350/=	350/=	350/=	——
5001-10.000 TONS	»	400/=	400/=	400/=	——
10001-15000 TONS	»	500/=	500/=	500/=	——
Ka badan 15000 TONS	»	800/=	800/=	800/=	——
Jumbo	»	1500/=	1500/=	1500/=	——

WAKAALADDA DEKEDAHA SOOMAALIYEED

TARIIFADA DAKHLIGA

TABBEELLA «K»

IJAARKA WIISHASHKA SOCDA

SHAQO	QAADKA WIISHASHKA			
	SALDHIGGA	ILAA	ILAA	ILAA KA BADAN
DAKHLIGA	5000kg.	5001-15000kg.	15001-25000kg.	25000kg.
GUDAHA	TANKII	60/=	100/=	150/= 1000/=
DIBADDA	SAACADDII	250/=	400/=	500/= 2000/=

WAKAALADDA DEKEDAHA SOOMAALIYEED

TARIIFADA DAKHLIGA

TABBEELLA «L»

IJAARKA FORKLIFTKA

GOOBTA

SALDHIGGA

SHAQADA

DAKHLIGA

QAADKA FORKLITKA

GUDAHA DEKEDDA

HALKII TAN

SH.SO.

50/=

DIBADDA DEKADDA

HALKII SAAC

SH.SO.

180/=

WAKAALADDA DEKEDDADA SOOMAALIYEED

TARIIFADA DAKHLIGA

TABBEELLA «M»

IJAARKA CAGAFTA IYO GAARIYADA

GOOBTA	SALDHIGGA	CAGAFTA	GAARIYADA	
SHAQADA	DAKHLIGA		1-20 TONS	Ka badan 20 TONS
Dekedda Dibedda	Saacaddii	100/=	400/=	600/=
TRACTOR GOOSNIC ETC.		300/=	—	—



WAKAALADDA DEKEDAAHA SOOMAALIYEED  
TARIIFADA DAKHLIGA  
TABBEELLA «N»

IJAARKA QALABKA SAARISTA IYO DEJINTA BADEECADDA

QALABKA	SALDHIGGA DAKHLIGA	KHIDMADDA
Xarig Shabaq ah	Maalintii/Shabaq	60/=
Xarig Caadi ah	Maalintii/Xarig	70/=
Waayirka	Maalintii/Waayir	80/=
Baalet	Maalintii/Baalet	10/=
Silsilado	Maalintii/Silsilad	40/=

WAKAALADDA DEKEDAHA SOOMAALIYEED

TARIIFADA DAKHLIGA

TABBEELLA «O»

IJAARKA QALABKA BADDA

NOOCA QALABKA	SALDHIGGA		DEKEDDA DIBADDEEDA	
	DAKHLIGA	Gudaha	Shaqo caadi ah	Gurmadka Maraakiibta
TAAGAGGA	SAACADDII	2500/=	3000/=	4500/=
MOTORADA	» »	250/=	—	—
DOONYAHA	MAALIN	500/=	1000/=	—

WAKAALADDA DEKEDAHA SOOMAALIYEED  
TARIIFADA DAKHLIGA  
TABBEELLA «P»  
IJAARKA BAKHAARRADA

MAALMAHA	F A A H F A A H I N		
	SALDHIGGA DAKHLIGA	BARXADAHA BANNAAN	GUDAHA BAKHAARRADA
10ka Beri ee u horeysa	Maali/ii 100 kg.	0.30	0.50
10ka Beri ee labaad	Maali/ii 100kg.	0.60	1.00
Wixii ka dambeeya	Maali/ii 100 kg.	1.00	1.50

WAKAALADDA DEKEDAHA SOOMAALIYEED

TARIIFADA DAKHLIGA

TABBEELLA «Q»

HAWLAHA KALA DUWAN

K H I D M A D D A H A

F A A H F A A H I N	SALDHIGGA DAKHLIGA	MALIN CAADI AH	JIMCE	CIIDAHA KALE
Biyaha Maraakiibta la siiyo	Tankii	15/=	15/=	15/=
Kala wareejinta badeeco Mar- kabka dushiisa	Tankii	20/=	20/=	20/=
Miisaanka Dekedda	Hal shay	20/=	20/=	20/=
Shaqo dheer.ah,Saar/Dej.Bad.	Khi/ha Tab.C	25/=	50/=	100/=
Dib u cabbeyn Badeeco	1000 kg.	5/=	5/=	5/=

Bad/cda Dekedda ka baxda galab	Baabuur	40/=	40/=	40/=
Bad/cda Dek-ka baxda Galab	G/Dameer	10/=	10/=	10/=
Nadiifin godka Markabka	God/Saacad	1000/=	1200/=	1500/=
Diyaarin Godka Markabka	Wiish/Saac.	400/=	500/=	600/=
Xayiraad Bilote	Nus Saaue	150/=	200/=	300/=
Xirid/Furid/Godka Markabka	God/Saacad	400/=	500/=	600/=
Qaadka Culus	Hal Qaad oo gaara ama ka badan 5 Ton	30/=	30/=	30/=
Cabbayn Kontainarka	Halkii	500/=	600/=	800/=
Faaruuq Kontaynar	Halkii	200/=	300/=	400/=
Rakaabka	Qofkii	18/=	18/=	18/=
Sahay Siinta	1000 kg.	5/50	5/50	5/50
Alaabta Rakaabka	1 Cuddo	10/=	10/=	10/=
Boosta	1 Cuddo	10/=	10/=	10/=

WAKAALADDA DEKEDAHA SOOMAALIYEED  
TARIIFADA DAKHLIGA  
TABBEELLA «R»

F A A H F A A H I N	MIISAAN AMA	ILAA IYO	1001-1500	1501-2000	Above 2000	
	TIRO	600 kg.	601-1000 kg.	KG.	KG.	KG.
CARS	PER NO	400/=	600/=	1000/=	1500/=	2400/=
LORY TRUCKS	» »	400/=	600/=	1000/=	1500/=	2400/=
TRACTORS	» »	400/=	600/=	1000/=	1500/=	2400/=
CAGAFYO	» »	400/=	600/=	1000/=	1500/=	2400/=
CRANES	» »	400/=	600/=	1000/=	1500/=	2400/=
BULDOSERS	» »	400/=	600/=	1000/=	1500/=	2400/=

WAKAALADDA DEKEDAHA SOOMAALIYEED

TARIIFADA DAKHLIGA

TABBEELLA «S»

KHARAJKA DOONYAHA

F A A H F A A H I N

SALDHIGGA

D E K E D A H A

DAKHLIGA MUQDISHO BERBERA KISMAAYO MARKA

Hawlaha Guud ahaaneed

Doon/Safar 600/=

600/=

600/=

600/=

WAKAALADDA DEKEDAHA SOOMAALIYEED

TARIIFADA DAKHLIGA

TABBEELLA «T»

HAWLAHA GUUD AHAANEED

SALIID IYO BATROOLKA

SALIIDDA IWH.

SALDHIGGA

DAKHLIGA MUQDISHO BERBERA KISMAAYO MARKA

SAARIS	100 KG.	0.30	0.30	0.30	—
--------	---------	------	------	------	---

DEJIN	100 KG.	0.50	0.50	0.50	—
-------	---------	------	------	------	---

MOLASESS

SALDHIGGA

DAKHLIGA MUQDISHO BERBERA KISMAAYO MARKA

SAARIS	—	—	—	0.70	—
--------	---	---	---	------	---

DEJIN	—	—	—	0.70	—
-------	---	---	---	------	---



MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In J. War. dhumay oo lambarkiisu ahaa 709599 lagana soo saaray Bankiga Banacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Hodon kuna qo ran lacag dhan Sh.So. 50.000 uu iska lahaa Xaaji Cali Axmed sida ku cad warqadda lambarkeedu 002 taariikhdu 19.1.84 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Hodon;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lam. 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabiyo(Ammortamento) Jeegga War. Lam. 709599 oo ku qoran Xaaji Cali Axmed ayna ku jirto Sh.So. 50.000.

WUXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Hodon u beddelo Xaaji Cali Axmed J. War. ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah kadib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maal mood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Ras miga ah ee J.D.S. haddii inta ka horaysa aan wax ishor taag ahi laga keenin.

Muqdisho, 21.1.84

GUDDOOMIYAHA MGB  
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maa

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In J. War. dhumay oo lambarkiisu ahaa 709603 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Hodon kuna qoran lacag dhan Sh.So. 50.000 uu iska lahaa Xaaji Cali Axmed sida ku cad warqadda lambarkeedu 002 taa riikhdeedu 19.1.84 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Hodan;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lam. 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyoo (Ammortamento) Jegga War. Lam. 709603 oo ku qoran Xaaji Cali Axmed ayna ku jirto Sh.So. 50.000.

WUXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Hodon u beddelo Xaaji Cali Axmed J. War. ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. haddii inta ka horaysa aan wax ishortaag ahi laga keenin.

Muqdisho, 21.1.84

GUDDOOMIYAHA MGB  
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In J. War. dhumay oo lambarkiisu ahaa 709606 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Hodon kuna qoran lacag dhan Sh.So. 50.000 uu iska lahaa Xaaji Cali Axmed sida ku cad warqadda lambarkeedu 002 taariikhdu 19.1.84 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Hodon;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lam. 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyoo (Ammortamento) Jeegga War. lam. 709606 oo ku qoran Xaaji Cali Axmed ayna ku jirto Sh.So. 50.000.

WUXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Hodon u beddelo Xaaji Cali Axmed J. War. ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan yarayn 15 maal mood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Ras miga ah ee J.D.S. haddii inta ka horaysa aan wax ishor taag ahi laga keenin.

Muqdisho, 21.1.84

GUDDOOMIYAHA MGB  
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

MAXKAMADDA G. TOGDHEER BURCO.

GUDDOOMIYAHA MAX. G. TOGDHEER BURCO  
IYADOO UU ARKAY: Dacwadda ku saabsan Jeegag  
lumay;

HADDUU ARKAY: Ogaysiinta Bangiga Ganacsiga  
iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Burco;

HADDUU ARKAY: Qod. 69. DL. 9.9.65 Lumid Jeegag-  
ga wareega ee kala ah.

1) J/Wareega Lam. 378196 kuna jirtay Lacag dhan  
Sh.So. 50,000 kuna qoran yahay Maxamed Axmed  
Yuusuf lagana sameeyey Laanta Berbera Tr.23.9.82.

2) J/Wareega Lam. 399202 kuna jirtay Lacag dhan  
Sh.So. 9,980/=kuna qoran yahay Bashiir Maxa-  
muud Xalane lagana sameeyey Laanta Burco

WUXUU AMRAYAA

In loo cusbooneysiyo Jeegaggaas wareega Jaalle  
Cabdi Faarax Xirsi marka ay ka soo wareegto muddo  
20 casho gudahood ah laguna sharciciyo Faafinta Ras-  
miga ah ee Dawladda.

WAXAA LAGA CODSANAYAA

In Jeegagga Cusub ee la samayn doono gacanta  
laga saaro Jaalle Cabdi Faarax Xirsi iyadoo la sugayo  
Muddada kor ku xusan.

BURCO. 7.12.83

GUDDOOMIYASA M.G.T.BURCO

(Dr. Cab/raxmaan Sh. Maxamed)

KAALIYAHA M.G.T.BURCO  
(Jaamac Cabdullaasi Bile)

MAXKAMADDA G. TOGDHEER BURCO

GUDDOOMIYAHA MAX. G. TOGDHEER BURCO  
IYADOO UU ARKAY: Dacwadda ku saabsan Jeegag  
lumay;

HADDUU ARKAY: Ogaysiinta Bangiga Ganacsiga  
iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Burco;

HADDUU ARKAY: Qod. 69. DL. 9.9.65 Lumid Jeegag-  
ga wareega ee kala ah.

1) J/Wareega Lam. 380040 (2) J/Wareega Lam.  
380041, lacagta ku qornaydna ay tahay midkiiba  
Sh.So. 50,000/= oo ku qoran yahay Jaalle Maxa-  
med Axmed X. Ibraahim Tr. 27.10.82 lagana samee-  
yey Laanta Berbera.

WUXUU AMRAYAA

In loo cusbooneysiyo Jeegaggaas wareega Jaalle  
Cabdi Faarax Xirsi marka ay ka soo wareegto muddo  
20 casho gudahood ah laguna sharciyo Faafinta Ras-  
miga ah ee Dawladda.

WAXAA LAGA CODSANAYAA

In Jeegagga Club ee la samayn doono gacanta  
laga saaro Jaalle Cabdi Faarax Xirsi iyadoo la sugayo  
muddada kor ku xusan.

BURCO. 7.12.83

GUDDOOMIYASA M.G.T.BURCO

(Dr. Cab/raxmaan Sh. Maxamed)

KAALIYAHA M.G.T.BURCO  
(Jaamac Cabdullaasi Bile)

MAXKAMADDA G. TOGDHEER BURCO  
GUDDOOMIYAHA MAX. G. TOGDHEER BURCO  
IYADOO UU ARKAY: Dacwadda ku saabsan Jeegag  
luray;

HADDUU ARKAY: Ogaysiinta Bangiga Ganacsiga  
iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Burco;

HADDUU ARKAY: Qod. 69. DL. 9.9.65 Lumid Jeegag-  
ga Wareega ee kala ah.

1) Jeegga Wareega Lam. 665660 (2) Jeegga Waree-  
ga Lam. 665661, (3) Jeegga Wareega Lam. 665662

4) Jeegga Wareega Lam. 665663, (5) Jeegga Waree-  
ga Lam. 665664 (6) Jeegga Wareega Lam. 665665,

7) Jeegga Wareega Lam. 66569 oo midkiiba ay ku  
qoran tahay Lacag dhan Sh.So. 20.000/= waxaana  
laga sameeyey Laanta Burco kuna qorayd Xaliimo  
Maxam d Cabdi Tr. la sameeyey 30.10.82.

#### WUXUU AMRAYAA

In loo cusbooneysiyo Jeegaggaas wareega Jaalle  
Cabdi Faarax Xirsi kaasoo ay ka lumeen Jeegaggaasi  
marka ay ka soo wareegto muddo 20 casho gudahood  
ahi laguna sharciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

#### WAXAA LAGA CODSANAYAA

In Jeegagga Cusub ee la samayn doono gacanta  
laga saaro Jaalle Cabdi Faarax Girsi iyadoo la sugayo  
muddada kor ku xusan.

BURCO 7.12.83

#### GUDDOOMIYASA M.G.T.BURCO

(Dr. Cab/raxmaan Sh. Maxamed)

KAALIYAHA M.G.T.BURCO

(Jaamac Cabdullaasi Bile)

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR  
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;  
HADDUU ARKAY: In B g Kayd dhumay oo lambar-

kiisu ahaa 2807 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Wadajir kuna qoran lacag dhan Sh-So. 30.400 uu iska lahaa Maxamuu dNegeeye Abtidoon sida ku cad warqadla lambarkeedu yahay 000006 taariikhleedu 8.1.84 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keylka Soomaaliyeed Laanta Wadajir.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buugga K. Lamb. 2807 oo ku qoran magaca Maxamuud Negeeye Abtidoon ayna ku jirto Sh-So. 30.400.

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Wadajir u beddelo Buugga Keydka ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan is hortaag laga keenin.

Muqdisho, 8.1.84

GUDDOOMIYAHA MGB

Dr. Cabdullaahi Maxame dMaax

10

11

12

13

14